

#279 DIYAAR U AH DIB-U-BILOW


OSSEO AREA SCHOOLS

ISD 279

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Department of Education) waxa ay dejisay seddex qaab oo waxbarsho sannad-dugsiyeedka 2020-2021. Waxaa aan filaynaa in marna la gali marna laga baxi sedexdaa qaab ee waxbaridda ah inta lagu jiro sannadka oo dhan si looga jawaabo tilmaamaha gobolka iyo xaalada fayraska.

Intaa waxaa dheer, guddoomada waxbarashadu waxay ugu baaqayaan qoysaska doorasho ay dooran karaan in guriga Wax lagu Barto (Distance Learning Academy) ilmahoooda qoysaska ay ka go'an tahay in sanadka oo dhan ilmahooodu gurija kaliya uun ay wax ku bartaan.

ISKUULKA XAADIRKA LAGU YAHAY



Ardaydu maalin walba iskuulka ayey tagi, iyadoo ay jiraan taxadaro dheeraad ah oo ay ku jiraan xirasho af-dabool iyo ku dhaqan hab kala fogeyn dadka ah kolki ay suurta-galka tahay.

QAABKA ISKU-DHAFKA AH



Ardaydu iskuulka waxa ay tegi maalmaha qaarkeed iyagoo kooxo tiro yar ah si loo yareeyo tirada ardayda ah ee fasalka ku wada jirta loona hirgeliyo kala fogeynta dadka. Kolka aysan iskuulka joogin, ardaydu hawlaho macallinku uu u diro waxa ay sameyn iyagoo dibada jooga (guriga).

WAXBARASHADA DURUGSAN



Dibad wax ku barashada waxaa la isticmaali doonaa hadii ardayda iyo shaqaalaha aan loo ogolayn inay joogi karaan goobaha waxbarashada SIDA ay fartay hay'ada Waxbarashada MDE. Ardaydu waxa ay ka qayb gali doonaa waxbarashada durugsan waqtiga oo dhan. Barnaamijiyada sannadkani waxaa ka muuqda isbeddo wanaag ah kolka la barbar dhigo sannadkii hore marka la eego jawaabo-celino laga helay shaqaalaha, waalidka iyo ardaydaba.

CUSUB: AKADEEMIYADA WAXBARASHADA DURUGSAN



Qaab cusub oo waxbarasho durugsan oo ay dooran karaan qoysasku

Qoysaska raba 100% waxbarashada durugsan waxay iska qori karaan Akadeemiyada Waxarashada Durugsan (Distance Learning Academy).

Akameeyadan oo ay dhigaan macalimiin ka tirsan Gudoonka 279 (District 279), waxay siisa qaab kale oo waxbarid ah dadka raba inaan ilmahoooda inaba wax lagu barin iskuul dhexdiisa/iyadoo la wada joogo. Akadeemiyada waxa ay u hawlgeli si ka madax-banaa qaabka waxbarida ah ee iskuulka la tago ama isku-dhafka ah ama waxbarashada durugsan ee ay dhici karto in la adeegsado sannadka oo dhan.

LABO WAX OO AY KALA DOORAN KARAAN QOYSASKU

Qoysaska Iskuulada Agagaarka Osseo (Osseo Area Schools) waxa ay haystaan labo wax oo ay kala dooran karaan sannad-dugsiyedka 2020-2021:

1. Raacid dhaqan-gelinta qaababka gudoonka iskuulka ee aan xasiloonayn ee iskuul wax ku barida ah, isku-dhafka (guriga iyo iskuul) ama waxbarasho durugsan, oo hadba midba mar la galayo kolkii loo baahdo iyadoo la tixraacayo sida ay qabaan habraacyada gobolka iyo xaalada fayraska AMA.



2. Doorashada 100% waxbarashada durugsan ee Akadeemiyada Waxbarashada Dibada (Distance Learning Academy) hadii aad jeceshahay hubaasha ah in ilmahaaga waxbarashadiisa 2020-2021 aysan ku jiri doonin in isagoo xaadir ah iskuulka/goobaha waxbarashada aan wax lagu barin marnaba.



Akhbaar faah-faahsan oo arrintan ku saabsan waxaa la soo gelin doonaa gudoonka shabakadiisa (website) ah, www.district279.org, kolka ay diyaar noqoto.

Fadlan ogow: Akhbaartani waa isbedeli kartaa sannadka oo dhan markii la rabo kolka ay is bedelaan hagitaanada gobolku si wax looga qabto xaalada fayraska.

QAABKA TEGISTA ISKUULKA (ARDAYDA OO DHAN, KA HOR-K* ILAA IYO FASALKA 12)

* waxa uu quseeyaa ardayda la qoray maalinta barkeeda, maalin walba barnaamijada ah ka hor-K da ee Birch Grove, Crest View, Edinbrook, Fair Oaks, Garden City, Palmer Lake, Park Brook, iyo Zanewood

KA TAXADARIDA AMAANKA

-  ✓ Qaab-fadhiyeed fasalka dhexdiisa ah ayaa la abuuri doonaa iyadoo la tixraacayo habraacyada gobolka. Tusaale ahaan, ardayda hada kadib kooxo yaryar iyagoo ah lama wada fariisan doono.
-  ✓ Waqtiyada basasku ardayda qaadayaan ama dajinayaan waxaa dhici karta in la kala dheereeyo dhowr daqiiqo si kolkaa loo yareeyo kooxaha ardayda ah ee isu imaanaysa waqtiyada imaanshaha ama rawaxaaqada.
-  ✓ Sida uu dhigayo amarka sare ee gudoomiyaha gobolku, waji-dabool inay xirtaan ayaa laga rabi doonaa shaqaalaha iyo ardayda dhigta fasalada uulada iyo fasalada 12. **Ka reebid arrintaa ah ayaa la ogolaan karaa sida ku qeexan amarka gudoomiyaha gobolka. Ardayda hesha Waxbarashada Ilmanimada ee hore iyo kuwa fasalada ka horeeya uulada, waa lagu dhiiri-gelinayaa, laakiin aan khasab ku ahayn, inay xirtaan waji-dabool.
-  ✓ Ardayda waxaa laga rabaa inay gacmaha dhaqdaan ama ay isticmaalaan gacme nadiifiye kiimiko, gaar ahaan ka hor waqtiyada wax cunida. Meelo ay ku jiraan kiimikada gacmo nadiifinta ayaa Iskuul walba loo sameyn doonaa.
-  ✓ Qadada iskuulka laga bixin doonaa waa qado kulul iyo mid qabow labadaba iyadoo hab-dhaqan amaan-sugid ahi uu degsanaan doono, sida, inaan cuntada qofna iskii u soo guran karin iyo in la xadido isticmaalka waxyabaha inta badan la taabto sida kiiboodhyada. Goobo kale oo dheeraad ah ayaa la soo heli oo ardaydu ku qadayso.
-  ✓ Iskuuladu waxa ay heli doonaan aalado iyo sunta wax lagu nadiifiyo oo dheeraad ah. Waxa aad ku arki doontaa xandaab ku hareeraysan xafiiskyada meesha laga soo galayaa calaamado cusub, iyo meelo dib u habeyn lagu sameeyey si loo dhaqangeliyo kala fogeynta dadka.
-  ✓ Hababka makaanikada wax ayaa laga bedeli si loo kordhiyo hawada dibada ka soo galaysa dhismayaasha.
-  ✓ Dhamaan shaqaalaha, ardayda iyo booqdayaasha waxa ay ka qaybgeli doonaan baaritaan caafimaad oo maalinle ah (su'aalo taxane ah ayaa la iswaydiin).

WAXBARIDA IYO WAXBARASHADA; CAAWINTA ARDAYGA

- ✓ Ilmahaagu waxa uu heli doonaa waxbarasho tayo sare leh iyo hab waxbarid ah oo macalin hago oo soo jiidasho leh 5 casho usbuuci.
- ✓ Dhowrka asbuuca ee hore waxa ay lahaan doonaan xoog saarid xoogan oo ku saabsan dhisida xirriirada, ogaanta farqiyada u dhaxeeya gu'gii hore iyo xagaaga, iyo ka caawinta ardaydu inay dareemaan in la soo dhaweeynayo ayna ku taxan yihiin iskuulkooda.
- ✓ Ilaa iyo intii la awoodo oo suurta-gal ah, waxbaridu waxa ay u ekaan loona dareemi sidii ay ahayd ka hor inta uusan dilaacin cudurka COVID-19.

DUGSIYADA HOOSE

- ⇒ Shaqaalahu waxa ay si gaar ah ugu fiirsan doonaan caawinta aqoon-yahanada ardayda yaryar ahi inay la qabsadaan dib ugu soo noqoshada iskuulka, dhengalka saaxiibadooda, iyo xoojinta xirfadaha tacliineed.



DUGSIYADA DHEXE

- ⇒ Iskuuladu waxa ay fidin doonaan ka hor iyo/ama ka dib iskuulka barnaamijyo waxbarid ah si wax looga qabto farqiga u dhaxeeya xaalada gu'gii hore iyo xagaaga.



DUGSIYADA SARE

- ⇒ Waqtiyada fasalada lagu kala wareego waa la kala hor marin doonaa qaabka isu-socodkana wax baa laga bedelay si loo yareeyo tirada ardayda ah ee ku sugnaanaysa marinada iskuulka isla mar.
- ⇒ Iskuuladdu waxa ay fidin doonaan barmaajyo kale oo dheerad ah si wax looga qabto farqiyada u dhaxeeya gu'gii hore iyo xagaaga.
- ⇒ Si loo qorsheeyo inta qof uu baasku qaadayo, Qoysaska ardayda dugsiyada sare (fas. 9-12 kaliya) waxaa laga codsanayaa inay isku diiwaan-geliyan bas qaadida.



QAABKA ISKU-DHAFKA AH (ARDAYDA OO DHAN, KA HOR-K* ILAA IYO FASALKA 12)

* waxa uu quseeyaa ardayda la qoray maalinta barkeeda, maalin walba barnaamijyada ah ka hor-K da ee Birch Grove, Crest View, Edinbrook, Fair Oaks, Garden City, Palmer Lake, Park Brook, iyo Zanewood

KA TAXADARIDA AMAANKA



- ✓ Taxadarada dhanka amaanka ahi waxa ay la mid yihii kuwa qaabka fasal xaadir ku ahaanta, iyadoo leh kala fogeyn dadka ah oo adag iyo xadidid mugga goobaha.

WAXBARIDA IYO WAXBARASHADA; CAAWINTA ARDAYGA

- ✓ Iskuulka waxaa la dhigan doonaa 5-cisho asbuucii iyagoo laga bixin doono waxbarasho tayo sare leh iyo hab waxbarid ah oo macalin hago iyo/ama gargaar maalin walba ah.
- ✓ Si loo yareeyo tirada ardayda ah ee iskuulka ku jirta markiiba, ardayda waxaa loo kala saari doonaa labo kooxood oo kala ah Koox A (Group A) ama Koox B (Group B).
 - ▶ **Ardayda Kooxda A (Group A)** waxa ay iskuulka dhigan doonaan iyagoo iman doona Isniinaha iyo Arbacooyinka, halka iyadoo macalin waxbarayo ay dibada wax ku baran doonaan Talaadooyinka iyo Khamiisaha.
 - ▶ **Ardayda Kooxda B (Group B)** waxa ay iskuulka dhigan doonaan iyagoo xaadir ku ah Talaadooyinka iyo Khamiisaha, halka iyadoo macalin waxbarayo ay dibada wax ku baran doonaan Isniinaha iyo Arbacooyinka.
 - ▶ **Jimce walba**, dhamaan ardayda oo dhami waxa ay ka qaybqaadan doonaan waxbarashada durugsan (waana la is xaadirin maalintaa).
 - Maalmaha dibada wax lagu baranayo, ardayda waxa laga rabi karaa qaar ama dhamaan kuwan soo socda: waxbarid toos ah oo khadka wax lagu baranayo, kali wax u barasho, iska xaadirin khadka (on-line) ka iyo waxbarid cajalad horey loo duubay wax laga barto iyo casharo gaar ah.
 - Macalimiintu waxa ay u isticmaali doonaan Jimcayaasha diyaarinta casharada, wada-shaqeyno, iyo abuuritaanka waxa la baranayo.
 - Jimcayaashu waxa ay sidoo kale loo isticmaalaa si dhamaystiran u nadiifinta iskuulka iyo keenitaanada cuntooyinka iyo alaabta iskuulka.
 - ▶ **Mar walba oo ay suurtowdo**, ilmaha walaalaha ah waxaa la wada gelin isku koox.





Isniin

Talaaddo

Arbaco

Khamiis

Jimce



DUGSIYADA HOOSE

- ⇒ Maalin walba, xataa maalmaha dibad wax ku barashada, waxaa jiri doona nooc waxbaridoo toos ah oo macalimiintu bixiyaan.
- ⇒ Iskuuladu waxay ku dadaali doonaan inay u bixiyaan waxbarida maalmaha wax ku waxbarashada dibada qaab siiya xornimo qoysaska dugsiyada sare, gaar ahaan, waalidiinta/daryeeleyaasha shaqeeya maalintii.



DUGSIYADA DHEXE

- ⇒ Iskuuladu waxa ay fidin doonaan ka hor iyo/ama ka dib iskuulka barnaamijyo si wax looga qabto farqiga u dhaxeeya xaalada gu'gii hore iyo xagaaga.
- ⇒ Maalmaha dibada wax lagu baranayo, ardaydu waxa ay geli karaan meelo kumbuyutarada ah oo laga gargaaro tacliinta ayna ka shaqeeyaan shaqaale shahaadi ah iyo kuwa aan ahayba.



DUGSIYADA SARE

- ⇒ Talaabada ama saanta waxbarashada waa la dhowri si loogu rido ardayda dhabaha qalin jarin.
- ⇒ Jadwalada wax baa laga bedeli doonaa si loo caawiyoo ka qaybgalka ardayda ee koorsoyinka farsamada gacanta ah sida, sawirka dhoobada ah, (FACTS) iyo tacliinta tiknoolajiyada.



QAABKA DIBAD WAX KU BARASHADA (ARDAYDA OO DHAN, KA HOR-K* ILAA IYO FASALKA 12)

* waxa uu quseeyaa ardayda la qoray maalinta barkeeda, maalin walba barnamijiyada ah ka hor-K da ee Birch Grove, Crest View, Edinbrook, Fair Oaks, Garden City, Palmer Lake, Park Brook, iyo Zanewood

WAXBARIDA IYO WAXBARASHADA; CAAWINTA ARDAYDA

- ✓ Iskuulka waxaa la dhigan doonaa 5-cisho asbuucii, isagoo leh jadwal ardaydu leedahay oo si cad loo bayaamiyey iyo dibad wax ku barasho macalin daadihiyo maalin walba.
- ✓ Jadwalka shaqaalaha, oo ay ku jiraan saacadaha caadiga ee shaqada xafiisiyada ee macalimiinta dugsiga sare ayaa waxaa la siin doonaa qoysaska oo dhan.
- ✓ Ardaydu waxa ay si buuxda u heli doonaan maadooyinka iyo tacliin heerkooda ah oo la bixinayo iyadoo wax lagu barayo dibada.



- ardayda waxa laga rabi karaa qaar ama dhamaan kuwan soo socda: waxbarid toos ah oo khadka macalin wax ugu barayo, kali wax u barasho, iska xaadirin khadka (on-line) ka iyo waxbarid cajalad horey loo duubay wax laga barto iyo casharo gaar ah.

- ✓ Wada xiriirka iskuulka iyo guriga sidii ay ahayd gu'gii 2020 waa laga sii wachnayn doonaa.

TUSMADA DIBADA WAX KU BARASHADA DUGSIYADA HOOSE EE MAALINTII

(TUSMO UUN; ISKUULADA JADWALADOODU WAA KALA DUWANAAN KARAAN)



Subaxii	Duhurkii	Galabtii
Waxbarasho toos ah oo markaa so-conaysa		
Akhris madax-banaan	Qado, waqtiga kala baxa	
Wax ku barasho cajalad horey loo duubay iyo casharo gaar ah, waxbarid kooxo tiro yar, kali-kali wax u barasho		Wax ku barasho cajalad horey loo duubay iyo casharo gaar ah, waxbarid kooxo tiro yar, kali-kali wax u barasho, gargaar tacliineed

DUGSIYADA HOOSE

- ⇒ Qandho ka cabirid ayaa lagu sameyn doonaa ardayda iyo shaqaalaha rugaha xanaanada ilmaha (dibad wax ku barashada kaliya).



DUGSIYADA DHEXE

- ⇒ Ardaydu waxa ay geli karaan meelo kumbuyuutarada ah oo laga caawinayo tacliinta ayna ka shaqeeyaan shaqaale shati leh iyo kuwa aan lahaynba.



DUGSIYADA SARE

- ⇒ Qaarka ka mid ah fasalada la xusho waxaa dhici karta in si weyn wax looga bedelo qaabkooda si loo sameeyo qaabka dibad wax ku barashada ah.



CUSUB: AKADEEMIYADA WAXBARASHADA DURUGSAN (DISTANCE LEARNING ACADEMY)

Qoysaska doonaya inay helaan hubaasha ah in dibada wax lagu barto sannadka oo dhan iyadoon loo kala gudbayn qaababka waxbarida waxa ay dooran karaan Akadeemiyada Waxbarashada Durugsan (K 12uun) ee Gudoonka oo dhan ka jirta. Si aad isugu diiwaan-geliso akadeemiyada la dooran karo, balanqaad hal sanno inaad ku jirayso ah ayaa la iska rabaa.



Heerka dugsiyada dhexe, tacliinta Akadeemiyada Waxbarashada Durugsan waxa ay la mid noqon doontaa qaabka waxbarshada dibeda ee caadiga ah.



Akadeemiyada Waxbarashada Dibadu waxa ay xooga saartaa maadooyinka ubucda ah ee qalin jabinta la isaga baahan yahay, sida, kuwa sareeya, kuwa AP iyo/ama kuwa la iska qaato ee aan muhiimka ahayn waxaa dhici karta inaysan jiri doonin.



Ardayda Akadeemiyada Waxbarashada Dibadu waxa ay yihiin kuwo "labo goor," qoran taa macnaheedu waa waxay ay mar walba ka tirsan yihiin iskuulka deegaankooda (iskuulada oo dhan oo ay ku jiraan maagneedku).

Kani waa barnamij gudoonka oo dhan ka jira oo ka soo qaata macallimiin iskuulada gudoonka oo dhan. Adeegyada Waxbarashada gaarka ah iyo kuwa barta afka Ingiriiska ayaa la bixin doonaa. Ardayda dhigata fasalada K-5 waxa ay ku baran doonaan casharo aalada la yiraa doonaan (Seesaw), ardayda dhigata fasalada 6-12 na waxa ay ku sameyn doonaan casharo Aalada (Schoology).

Qoysasku waa khasab inay isqoraan Akadeemiyada Waxbarashada Dibada ugu dambayn 9 ka fiidnimo, Axadda, bisha Agoosto ay tahay 12 ka.

Codsiyada ku saabsan ka bixida Akadeemiyada Waxbarashada Durugsan iyo ku soo noqoshada iskuulka deegaanka ee laga diiwaangeshan yahay xilliga sannad-dugsiyeedkan lama bixin karo hubaal in la ansixin doono. Codsiyada ku saabsan wax bedelida waxaa la eegi ka hor bilowga simistar walba ansaxintooduna waxa ay ku xirnaan doontaa helitaanka macallimiin shati leh iyo gaadiid.

Ka gow wax badan oo ku saabsan iska diiwaan gelinta Akadeemiyada shabakadan ah <https://bit.ly/279distancelearningacademy>

Waa maxay sababta Akadeemiyada Waxbarashada Durugsan ay ugu baahan tahay balan-qaad dhigasho sannad buuxa ah?

In la balan qaado in sannadka oo dhan la dhiganayo Akadeemiyada Waxbarashada Durugsan waa lagama maarmaan si gudoonku uu si quman ugu qabto shaqaale (ay ku jiraan tiixelinta shatiyo gaar ah), u sameynta jadwal quman ee koorsoyinka ardayda iyo xiriirinta gaadiidka iyadoo loo hogaansamayo habraacyada hay'adaha (MDE/MDH).

MID WALBA OO QAABABKA WAXBARIDA AH WAXA AAD KA FILI KARTAA:

TAXADARO AMAANKA LA XIRIIRA



- ✓ Wuxuu aanaa raaci doonaa habraacyada Waaxda Caafimaadka ee MN (MN Dept of Health), iyo Waaxda Waxbarashada ee MN (MN Dept of Education).

⇒ Marmarka qaarkood hay'adaha MDH iyo MDE waxa ay u baahan sameynta falal gaar ah; marmarka qaarkood waxa ay ku talin sameynta falal nooc gaar ah.



- Hadii fal loo baahdo, waxa aad arki doontaa iyadoo falkaa laga hirgaleyey iskuuladayada.
- Hadii fal lagu taliyo, waxaa dhici karta inaad ku aragto meelaha qaarkood laakiin aadan meel walba ku arag.



- ✓ Iskuul walba waxa uu u magacaabi doonaa qof heer-iskuul ah oo xiriiriya hawlaha COVID-19 waxa uuna abuuri qorshe u gaar ah goob walba oo waxbarasho.



- ✓ Dhamaan shaqaalahaa oo dhan waxaa la siin doonaa tababar ku saabsan wacyi-gelinta COVID iyo sida si quman loogu isticmaalo alaabta wax lagu nadiifiyo.



- ✓ Safaro dibad aadid ah lama bixin doono.

- ✓ Booqdayaasha iyo tabarucyaasha waa la xadidi soo gelidooda rugaha waxbarashada.

WAXBARIDDA IYO WAXABRASHADA; CAAWINTA ARDAYGA

- ✓ Maado walba, macallimiintu waxa ay xooga saari doonaan waxa ugu muhiimsan inuu ardaygu barto, taa oo abuuri aasaas ubuc u ah waxbarashada taa oo la isugu xiray sedex qaab oo waxbarasho si ay u ogolaato in si fudud loogu kala gudbo qaababka, si wax looga qabto xaalada fayraska.

- ✓ Qoysaska doonaya inay helaan hubaal ah in sannadka oo dhan dibada wax lagu baran doono (marba meel uma carari kartid. Hal qaab dooro) waxa ay dooran karaan Akadeemiyada Waxbarashada Dibada (Distance Learning Academy) ee Gudoonka oo dhan ka jirta ee ardayda K-12 kaliya uun quseeysa.

⇒ Si aad isaga diiwaangeliso Akadeemiyada la dooran karo, waxaa la isaga baahan yahay balanqaad sannadka oo dhan in ilmahu dhiganayaan ah.

- Heerka dugsiyada hoose, waxbarida Akadeemiyada Waxbarashada Dibadu (Distance Learning Academy) waxa ay la mid noqon doontaa mida qaabka waxbarida dibada ee caadiga ah.

- Heerka dugsiyada sare, Akadeemiyada Waxbarashada Dibadu (Distance Learning Academy) waxa ay xoogga saartaa maadooyinka ubucda ah ee qalin jabinta la isaga baahan yahay, sida, kuwa sareeya, AP iyo/ama la iska qaato ee aan muhiimka ahayn waxaa dhici karta inaysan jiri doonin.

- Kani waa barnaamij iskuulada oo dhan (ee ma aha mid ka jira hal iskuul uun) oo ka soo qaata macallimiin iskuulada degmada oo dhan.

- Qoysasku waa khasab inay doortaan Akadeemiyada Waxbarashada Dibada (Distance Learning Academy) ugu **dambayn 9 ka fiidnimo, Axadda, bisha Agoosto ay tahay 9 ka**. Learn more and register at <https://bit.ly/279distancelearningacademy>

- ✓ Qaab walba oo wax barasho ah waa la is xaadirin maalin walba.

- ✓ Adeegyada Waxbarashada gaarka ah iyo kuwa barshada afka Ingiriiska ayaa la bixin doonaa. Qaabka loo bixinayaana waxaa dhici karta inuu u ekaado mid ka duwan sidii hore, iyadoo hadba ku xiran qaabka, laakiin adeegyada waa la siin doonaa dhamaan ardayda loo aqoonsaday inay helaan.

- ✓ Dhamaan shaqaalahaa oo dhami waxa ay si gaar ugu fiirsan doonaan baahida waxbarashada ee dhanka bulshada iyo caadifada ee ilmaha, waxa ayna ka shaqeyn doonaan dib-u-dhisida xiriirada u dhaxeeya ardayda dhixdooda iyo shaqaalahaa.

- ✓ Kalkaliyeysaasha iskuulka iyo shaqaalahaa gargaarku waxa ay bixin doonaan adeegyo.

- ✓ Arday walba, ee dhigta fasalada K ilaa iyo 12, waxaa la siin doonaa aalad kumbuyuutar ah waxaana laga rabaa inay meel uu ka gaari karo u taal si hadii loo baahdo uu ugu kala gudbo qaababka waxbarashada.

- ✓ Caawimaada dhanka farsamada Tiknoolajiyadu waa ay sii socon doonaan iyana; caawinta iyo khayraadyada shabakadaha (internet) waa loo hayaa ardayda hadii loo baahdo.

- ✓ Helitaanka haynta ilmahu waxa ay ku xirnaan doontaa qaabka waxbarashada.

Ardyada Waxbarashada Ilmaha ee Hore (Early Childhood) iyo kuwa Waxbarashada Aasaasiga ah ee Dadka Waaweyn (Adult Basic Education) waxa ay ka heli doonaan akhbaar gaar ah oo ka iman barnaamijyadooda.

Waxbarashada Ilmaha ee Hore [Early Childhood (Arbor View)]: 763-391-8777

Waxbarashada Aasaasiga ah ee Dadka Waaweyn (Adult Basic Education): 763-566-5452